2012 ONTARIO BUDGET
Ontario
NEWS RELEASE
MINISTRY of FINANCE

FICIL ADAG oo loogu talagalay ONTARIO

Qorshe lagu Dheellitirayo Miisaaniyadda, laguna Abuurayo Shaqooyin, laguna Ilaalinayo Waxbarashada iyo Daryeelka Caafimaad

WARARKA Maarso 27, 2012

Miisaaniyadda 2012 ee Ontario ayaa waxa ka mid ah qorshaha lagu baabi'inayo hoos-u-dhaca maaliyadda kaas oo hoos u dhigaya korodhka lacagta lagu bixiyo barnaamijyada kuna xaddideysa qiimayaasha illaa $17.7 bilyan muddada saddexda sano ee soo socota ah, halka laga kordhinayo dakhliga illaa $4.4 bilyan iyada oo aan cashuurta kor loo qaadin.

Ficilkani dhabta ah ee loogu talagaly waqtiga dhabta ah wuxuu Ontario marinayaa waddadii ay ku baabi'in lahayd hoos-u-dhaca marka la gaaro 2017–18.

In ka badan 50 senti doolarkii kastaba ee ay kharash gareeyso dowladda Ontario ayay ku bixisaa magdhowga macallimiinta, dhakhaatiirta iyo kuwa kale ee ka tirsan qaybaha kale ee dowladda. Marka la eego dhibaatada daran ee maaliyadeed ee Gobolka soo food saartay, qiimayaasha magdhowga waa inay maareeysaa si ay ula kulanto bartilaamdyadeeda maaliyadeed iyo in ay dhowrto guulihii laga gaaray dhinaca waxbarashada iyo daryeelka caafimaadka ee siddeedii sano ee la soo dhaafay.

Nidaamka gorgortanka wadareed ayaa la ixtiraami doonaa. Meelaha aan heshiisyo waafaqaya qorshaha oo la isugu dheellitirayo miisaaniyadda isla markaana lagu ilaalinayo adeegyada ahmiyadda sare leh aan la isku afgaran karin, dowladdu waxay diyaar u tahay in ay ku taliso tallaabooyinka maamul iyo kuwa sharci ee lagama maarmaanka ah.

Dowladda ayaa ku talajirta inay soo saarto talaabooyin dhowr ah si ay uga dhigto magdhowga shaqaalaha dowladda kuwo ay bixin karaan cashuur-bixyeyaasha isla markaana noqota kuwo u raaga xubnaha qorshaha hawlgabka, kadib marka lala tashado dadka danaha ka leh ee arrintu saameyso. Tusaale ahaan, xaaladaha ay magdhowgu uu hoos-u-dhac ku jiro, shaqaale badan oo ka tirsan qaybaha dowladda ayaa la weydiisan doonaa in laga dhimo manfaca mustaqabalka kahor intaan laga codsan ku biirinta magdhow dheeraad ah loo-shaqeeyaha ama dowladda. Dadka xaadirkan hawlgabka ahi ma saamayneyso.

Miisaaniyadda 2012 waxay ku talineysaa tallaabooyin adag oo la qaado si la isugu dheellitiro miisaaniyadda marka la gaaro\ 2017–18, kuwaasna waxaa ka mid ah:

…/2

- Hirgalin keydin ah $4.9 bilyan illaa saddex sano.
- Hakinta saamiga guud ee Cashuurta Dakhliga Shirkadaha iyo naaquskyada saamiga Cashuurta Meheradda Waxbarashada illaa miisaaniyadda la dheelli-tirayo.
- Ku xaddidka Manfaca Tamarta Nadiifta ah ee Ontario bishii kasta 3,000 kWh
- Wax ka beddelka Barnaamijka Manfaca Daawada Ontario si boqolkiiba shan ka mid ah waayeelku – kuwa dakhliga ugu sarreeeya leh i– ay bixiyaan qayb ka badan intii hore kharashyada daawooyinka loo qoray
- Hubinta ajuurada isticmaalaha Ontario inuu ka soo kabto in ka badan oo ah qiimaha bixinta barnaamijyada iyo adeegyada
- Kordhinta waqtiga hakinta kordhiska lacag bixinta Xildhibaannada Baarlamaanka Gobolka (MPP) illaa 2 sano OO KALE—wadar ahaana ah shan sano.
- Dheereynta hakinta kordhiska lacag bixinta maamulka sare ee isbitaallada, kulliyadaha, jaamacadaha, guddiyada dugsi iyo wakaaladaha illaa labao sano oo kale —wadar ahaana ah afar sano.

Hoos-u-dhaca 2011–12 ayaa lagu qiyaasayaa inay ka hooseyso illaa $15.3 bilyan — $1 bilyan intii lagu saadaaliyay hal sano ka hor iyo in ka badan boqolkiiba 38 mid ka hooseeya saadaalintii hoos u dhicii 2009–10 deyrtii 2009. Haddii aan lagu kicin tallaabooyinka lagu dhawaaqay eeMiisaaniyadda 2012 Ontario hoos-u-dhaca ayaa ku dhawaan doonta $25 bilyan gudaha 2014–15. Hase yeeshee, waxa lagu qiyaasayaa inay noqoto $10.7 bilyan xisaab xirka sanadkaas.

Dowladda ayaa ku sii wadi doonta inay ku nuuxnuuxsato arrimo kala horreyntooda sidii ay u xoojin lahayd dhaqaalaha oo u furdaamin lahayd abuuritaanka shaqada.

Shaqooyinka iyo Barwaaqada

Si gacan looga geysto dhisitaankaOntario xoog leh oo dhaqaale kala-duwan leh oo awood u siiyaa meheradda inay maalgashi ku samaysato waxayaaabaha cusub , horayna u mariso wax soo saarka oo ay noqoto meel adduunka la baratanta, ayay dowladdu:

- In la isku raaciyo barnaamiyo badan taageera meheradda ku lug leh kuwa Kharashka Shaqooyinka iyo Barwaaqada oo ku nuuxnuuxsan doonta kordhita waxa soo saarka iyo abuuridda shaqada, isla marka iyada oo soo saarta guud ahaan keydin $250 milyan gudaha 2014–15
- In la abuuro Guddiga Deeyaha badan ee Shaqooyinka iyo Barwaaqada si ay ugala talin lahaayeen dowladda qorshe kor loogu qaado}Ontario wax soo saarkeeda, iyo inay hoggaamiyaan ajenda cilmi-baariswax soo arka iyo waxyaabaha cusub ee Ontario
- In la kala duwoOntario waxyaabaha ay u dhoofiseo dhaqaalayaasha soo kacaya iyada isku dubbaridda oo iskuduwda xayeysiiga waxqabayada ganacsiga ee wasaaradaha ay khuseyso.

Aqoonta iyo Xirfadaha

Dowladda ayaa ku sii wadi doonta dhisitaanka qorshaheeda inay yeelato xoog-shaqaale adduunka ugu fiican si loo hubiyo barwaaqada mustaqbalka dhaqaalaha ku dhisan-aqoonta iyada oo:

…/3

- Si buuxda u hirgalisa xarumaha xannaanada carruurta oo maalintii oo dhan ah illaa Sebtember 2014
- In la xaddido cabbirka fasalka ee fasallada ugu horreeya
- Iyada oo lagu sii wado u heellanaanta u fidinta naaquska 30% deeqda Qiimaha Waxabarashada Ontario ee loogu talagay ardayda u-qalma wax ugu baranaya jaamacadda iyo kulliyadda shahaadada kowaad wakhtiga-buuxana wax barta.
- Isku-keenidda barnaamijyada tababbaritaanka si looga dhigo kuwo waxtar u leh suuqa shaqooyinka maanta jira.

Wax Ka Beddelka Daryeelak Caafimaadka

Dowladda ayaa dhisi doonta Qorshaha Tallaabooyinka Ontario oo loogu talagaay Daryeelka Caafimaadka si loo abuuro nidaam daryeel caafimaad waara oo tayo-sare leh.

- Waxa ka beddelka daryeelka caafimaadka sidii laga naaquso lahaa saamiga koritaanka kharashaynta illaa celcelis ahaan boqolkiiba 2.1 sannadkiiba saddexda sannadood ee soo socota.
- Horumarinta daryeelka salka ku hay beesha sidii bukaanka loo daaweyn lahaa goobo duwan sida rugaha caafimaadka bilaa macaashka ah iyo gurigaba halkii ay ahaan lahayd Isbitaallada, meelaha ay ku habboon tahay
- Iyada loo guuro habab kharshayn bukaanka ku takhasusa sidii horumar loogu samayn lahaa qiimaha iyo tayada daryeelka.

XIGASHOOYINKA

"annagu waxaan samayneynaa go'aammada saxda ah sidii loo hubin lahaa inay qoysaska Ontario helayaan adeegyada ugu fiican ee suurtagalka ah iyoqiimaha ugu fiican doolarrada cashuurta. Dhammaanteen waxaan leenahay kaalin aan ka qaadano dheelli-tirka miisaaniyadda."
- Dwight Duncan, Wasiirka Maaliyadda

"Dhisitaanka Ontario ka xoog badan sidan ayaa u baahan ficil adag. Waxaan samayn doonaa xulashooyinka saxda sidii aan u ilaalin lahayn waxayaabaha muhiimka ee noo wada kordhay. Makaan xulashooyinkan sameyneyno, waxaan doorbidi doonaa dhowritaanka waxabarashada iyo daryeel caafimaadka mar kasta."
- Dwight Duncan, Wasiirka Maaliyadda

XAQIIQOOYIN DEGDEG AH

- Tallaabooyinka lagu soo jeediyay Miisaaniyadda 2012 awgood ayay Ontario hoos u dhaca miisaaniyada la isku ururtay aya ka yaraan doonta $22.1 bil marka loo eego haddii aan ficilka la qaadin.
- Halka doolar ee ah dakhliga lagu qeexay Miisaaniyadda 2012, waxa u jiri doona afar doolar oo ku yimaad tallaabooyinka keydinta iyo xaddidka-qiimaha.
- Tallaabooyinka lagu naaqusayo kharashka barnaamijka wadar ahaan $17.7 bilyan saddexda sano ee xigta, marka loo barbar dhigo siday haddii kale haan lahayd , waxana ka mid ah:

…/4

- $4.9 bilyan oo keydin la qorsheeyay ah oo ka yimaad koojinta iska-dul-baxa iyo ku cel-celiinta,markana la hirgaliyo hababka bixinta isku-dubbaridan ee intaa ka badan kuna takhasusta nuxurka meheradda.
- $6 bilyan oo ah ficillada dowladdu ka qaaddo si loo xakameeyo magdhowga guddiyada dugsiga, biximaha dhakhaatiirta iyo kuwa kale ee ka tirsan dhinaca dowladda.
- $6.8 bilyan oo ah in la xaddido qiimayaasha ka soo jeeda dhinaca guud ee dowladda.

- Dhaqaalaheeda Ontario ayaa la filayaa inuu koro ugu yaraan boqolkiiba 1.7 gudaha 2012, boqolkiiba 2.2 gudaha 2013 iyo boqolkiiba 2.4 markay tahay 2014.
- Gudihii 2011, waxa laga abuuray 121,000 shaqooyin dhexdeedaOntario— iyada shaqada-buuxda aya koradhay illaa 123,400.
- Qiimaha wax-ka-qabsshada deynta Ontario ayaa ah ku dhawaad ah $10 bilyan, aha kharashka-ugu-badan ee saddexaad ee sanndikii iyada oo ka hooseeya kharashka daryeelka caafimaadka iyo ka waxbarashada. Si loo garto taas, Ontario ayaa ku kharash gareysa sannad kasta dulsaarka in ka badan intay ku kharash gareyso kulliyadaha iyo jaamacadaha.
- Marka dulsaarku uu boqolkiiba hal kordho, qiimaha wax kaga qabashada deyntaa ayaa kor ugu kaca $467 milyan sannadka ugu horreeeya kordhitaanka. Haddii wax tallaabo ah aan laga qaadin dheelli-tirka miisaaniyadda, Ontario ayaa bixin doonta in ku dhow wax kaga qabashada deynta markay tahay 2017–18 intay ku bixiso waxbarashada maanta.
- Gudihii Febrawari 2012, ayay Guddiga Shirka Kanada soo jeediyeen haddii aan ficil laga qaadin xakamaynta koritaanka kharashaynta ontariohoos u dhacu noqon karo illaa 16 bilayan illaa markay noqoto 2017–18. Iyada oo la istcimaalyo sadaalintaa oo kale, ayay Guddiga Waxa Ka beddelka Adeegyada Dowladda Ontario ku qiyaastay inuu hoos u dhacu noqon karo illaa $30 bilyan.
- Gudaha 2011–12, qof kasta barnaamij kharashayn ayaa la filayaa inay noqoto $8,560. Tani waa tii ugu hooseysa gobollada waana boqolkiiba 11 ka hooseyn celceliska lagu bixiyo 9ka dowalado gobol ee kale.
- Ontario ayaa ku bixisa adeegyada dowladda tirada shaqaalaha dowladda ugu hooseeya marka loo eego qofka kasta.

KA OGOW WAXYAABO DHEERAAD AH

Akhri Miisaaniyadda Ontario ee 2012.

Wax dheeraad ah ka ogow waxa ku saabsan taallaabooyinka maareynta kharashaka ee ay qaadeyso Ontario.

Akhri macluumaadka ku saabsan waxay soo martay Miisaaniyadda Ontario ee 2012:

- Muuqaalka guud ee dhaqaalaha iyo Qorshaha Miisaniyadda Ontario
- Magdhowga Qaybaha Dowladda
- Dheelli-tirka Miisaaniyadda
- Nidaamka Dawooyinka oo Cadaalad Ah Si Fiicna u Shaqeeeya

Akhri qaybaha ugu muhiisan ee Miisaaniyadda Ontario ee 2012

-30-

LOOGU TALAGALAY WARSIGA WAR-BAAHINTA KALIYA:
Aly Vitunski, Xafiiska Ministerka, 416-325-9819
Scott Blodgett, Wasaaradda Maaliyadda, 416-325-0324

ontario.ca/finance-news
Somali

WARSIGA DADWEYNAHA MARKAY TAHAY U WAC:
1-800-337-7222
TTY (loogu talagalay dadka dhagaha wax ka qaba): 1-800-263-7776